



United Nations Educational, Scientific and Cultural Organizations

SAYNIS



HORDHAC

Buuggan oo ah sayniska fasalka 3aad, waxaa soo diyaariyey Xarunta Horumarinta Manaahijta ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta, waxaa uu ka mid yahay buugaagta manhajka cusub ee 1985ka bilaabmay.

Buuggan ujeeddada ugu weyn ee laga leeyahay waxa ay tahay in ardayda lagu abuurdo xirfado ay degaankooda ku fiirsadaan kuna baaraan, iyo in la siiyo aqoon sayniseed oo saldhig u noqon karta barashada sayniseed ee mustaqbalka.

Xasan Daahir Obsiye
Agaasimaha X. Horumarinta Manaahijta


Buuggaan waxaa soo ururiyay, iskuna soo dubariday daabacaadiisa labaad Kooxda Farsamada ee Xafiiska UNESCO-Baydhabo u qaabilsan talabixinta waxbarashada.

Agoosto 1995
Baydhabo, Soomaaliya

SAYNIS

3




Naqtiin "Noole"



Deegaankan waxa ka muuqda waxyaabo
kala duwan. Sheeg magacyada mid
walba?



Dhammaantood ma noolaa?
Immisa ayaa xayawaan ah?
Immisa ayaase dhir ah?






Layli:-

Tiri noolaha iyo ma-noolaha deegaankiina laga helo ka dibna mid walba khaanadda ku habboon ku buuxi.

Noole	Ma-noole	Dhir	Xayawaan

Kala duwanaanta xayawaanka


Astaamaha xayawaanka ee muuqda.



Deegaankeenna waxa ku nool xayawaanno fara badan. xayawaannadaasi waxa ay ku kala duwan yihiin xagga muuqaalka.

Magacow toban ka mid ah xayawaanadaasi?

Maxaa ay ku kala duwan yihiin xayawaanadaasi?




Layli:

Xayawaannada hoose mid walba astaamaha uu

leeyahay khaanadda ku beegan ku qor calaamaddan (✓)

Xayawaan	Laba Lugood	Afar Lugood	Baalal	Qolof	Geeso
Nin	✓				
Hal		✓			
Sac					
Diin					
Goroyo					
Shinni					
Yaxaas					
Rah					
Biciid					
Ayax					

Baaxadda xayawaanka.



Sawirradan waxa ka muuqda xayawaanno kala duwan.

Xayawaannadani waxa ay ku kala duwan yihiin xagga baaxadda. sheeg magaca xayawaannadan mid walba.


U tax xayawaannadan sida ay u kala waaweyn yihiin.

Layli:


Xayawaannada hoose mid walba baaxadda ku habboon
khaanadda ku beegan ku qor calaamaddan (✓).

Xayawaan	Weyn	Dhexdhexaad	Yar
Ri'			
Nibiri			
Balanbaallis			
Hal			
Eey			
Aboor			
Geri			
Injir			
Diin			

Koritaanka xayawaanka



Xayawaannada qaarkood waxa
ku dhaca isbeddel fara badan
marka ay korayaan.



Xayawaannada qaarkood isbeddel
yar ayaa ku dhaca marka ay
korayaan.


Layli :

1. Xayawaannada hoose mid walba isbeddelka ku dhaca marka uu korayo khaanadda ku beegan ku qor calaamaddan (✓)

Xayawaan	Isbeddel badan ayaa ku dhaca	Isbeddel yar ayaa ku dhaca
Diin		
Bakayle		
Lo'		
Rah		
Duqsi		
Dad		

2. Sawir ku muuji meertada nolosha ee digaagga.

Xayawaannadu ilmahooda ma xannaaneeyaan?





Sawirkan waxa ka muuqda xayawaanno kala duwan iyo ilmahood Sheeg magaca mid walba. Immisa ayaa xannaanaynaya ilmahooda? Ma ku aragtaa mid aan xannaanaynayn ilmihiiisa?

Layli:

Xayawaannada hoose mid walba sida uu ilmihisa u xannaaneeyo khaanadda ku beegan ku qor calaamaddan (✓).

Xayawaan	aad ayaa uu u xannaaneeya	Waxoogaa ayaa uu xannaaneeyaa	ma xannaaneeyo
Shinni			
Kalluun			
Quraanjo			
Dad			
Diin			
Adhi			
Balanbaalis			
Sagaaro			
Libaax			


Jidhka xayawaanka



Immisa xayawaan ayaa aad ku aragtaa sawirkan?
Sheeg mid walba magaciisa?
Maxaa uu jidhkoodu ku kala duwan yahay?





Layli:

1. Sawir baranbaro, ka dibna muuji qaybaha Jidhkeeda.



2. Baranbaradu waxa ay leedahay ---- Lugood.
3. baranbaradu waxa ay leedahay ---- baal.
4. Madaxa baranbarada waxa ku yaal ----- indhood oo waaweyn.

Waxtarka jidhka xayawaanka



Xayawaanka jidhkiisu waxa uu ka kooban yahay xubno kala duwan. Sheeg mid walba xubnaha muuqda ee jidhkiisa?

Xubin walba maxaa ay u tartaa xaya-waankaasi?

Xubnahaas la'aantood xayawaaannadaasi maxaa ku dhacaya?

Layli:

Weedhaha soo socda mid walba waxa ku hor qoran
laba eray. Weedh kasta erayga ku habboon ku buuxi
meesha bannaan.

1. Diinku marka uu dadka arko waxa uu isku
qariyaa _____ (Qolofitiisa, dhogortiiisa).
2. Gorayadu marka ay cadow ka baxsanayso waxa
ay adeegsataa _____ (lugaheed,
baalasheeda).
3. Rahu marka uu dabbaalanayo waxa uu adeegsadaa _____
_____ (lugaha, afka).
4. Maroodigu gacan dheer ayaa uu wax ku _____
(qabsadaa).
5. Shimbiruhu marka ay duulayaan waxa ay adeegsadaan
_____ (ciddiyaha, baalasha).

Xayawaannada aan dhaqano



Xayawaannadan dhammaantood waa
aynu dhaqannaa.

Xayawaannada aan dhaqannaa
waxa ay u baahan yihiin xannaano kala-
duwan. Xayawaannadan mid walba
sidee ayaa loo xannaaneeyaa?

Tilmaan xannaanada kale ee ay u baahan
yihiin.




Layli :

Ereyadan mid walba weedhaha hoos ku qoran meesha ku habboon ku buuxi.

Cudurrada Faraha, cuntooyin, hoy, adkaysi.

1. Xayawaannada aan dhaqano waxa ka mid ah _____
2. Si xayawaannada aan dhaqanno looga ilaaliyo roobka, dhaxanta iyo dugaaga waxa ay u baahan yihiin _____
3. Xayawaanka waa la daweeyaa si looga ilaaliyo _____
4. Xayawaannada aan dhaqanna waxa ay aan _____ kala duwan.
5. Xooluhu waxa ay u kala _____ badan yihiin haraadka _____
6. Sawir afar xayawaan oo ka mid ah xayawaannada aan dhaqanno _____

Isku ekaanta iyo kala duwanaanta dadka
Isku ekaanta dadka.



Eeg dadka ka muuqda sawirka.


Saddexda qofba waxa ay wadaagaan astaamo.

Tiri astaamaha ay dhammaantood wadaagaan.

Layli :

1. Magacow afar astaamood oo dadka oo dhammi leeyahay.
2. Sanka qofk immisa dul ayaa uu leeyahay ?
3. Immissa ciddiyood ayaa aad leedahay ?
4. Magacow laba xubnood oo madaxa ragga iyo dumarkaba ku yaal.

Kala duwanaanta dadka



Eeg dadka ka muuqda sawirkan.


Maxaa ay laba kasta oo is-garab taagani ku kala duwan yihiin?

Ma taqaan astaamo kale oo dadku ku kala duwan yihiin?

Layli:

1. Sheeg shan astaamood oo uu dadku ku kala duwan yahay?
2. Magacow qofka fasalkiinna ugu dheer.
3. Sheeg astaan ragga waweyn iyo wiilasha yaryaryahay ku kala duwan yihiin?
4. Dadka cagahoodu ma is-wada le'eg yihiin?

Histoogaraamka fasalka.



Sawirkan waxa ka muuqda arday taagan.

Sidee ayaa ay u safan yihiin?

Immisa ayaa gabdho ah, immisa ayaase wiilal ah?

Dharka ay wataan ma isku wada mid baa?

Layli:-

Ku qor magacaaga khaanadda ku habboon labada histoogaraam ee B iyo T.


B

Caasha	Gabdho
Kooshin	Wiilal

T

Yaasin	Deeqa
Dacas sita	Dacas aan sidan

Immisa ilkood ayaa aad leedahay?



Dadku waxa ay leeyihiin ilko

Immisa ilig ayaa uu qofka weyni leeyahay?

Maxaa ay ilkuhu inoo taraan?

Immisa jeer ayaa aad ilkahaaga nadiifisaa maalintii?

Layli :

1. Tusaha hoose noocyada ilkaha mid walba inta adigu aad leedahay ku qor khaanadda bannaan ee ku beegan.

Nooca ilkaha	Tirada Ilkaha
Foolal	
Dhoolo	
Miciyo	
Gowsyo	
Wadar	

- b) Tirada ilkahaagu ma la mid yihiin kuwa aabbaha?
 t) Qofka weyni immisa ilkood ayaa uu leeyahay?
 j) Dhammaan ilkahaagu ma isku wada nooc baa?

Sacabkaagu intee ayaa uu qaadi karaa?



Qaadka sacabbada dadku waa uu kala duwan yahay.

Qaadka sacabka qofku ma ku xidhan yahay dhererka farihiisa?

Sacabka ballaadhan iyo midka dhuuban mid-kee ayaa qaad weyn?

Sacabku inta uu qaadi karaa ma ku xidhan



yahay lab iyo dheddig qofku midka uu yahay.

Layli:

Tusaha hoose ku qor magacaaga iyo labadaada gacmood mid walba inta ay qaaddo khaanadaha ku habboon.

Wiilal	Tirada	Miraha	Gabdho	Tirada	Miraha
Magac	Midig	Bidix	Magac	Midig	Bidix

Taakada wax baa lagu cabbiraa



Taakadu waxa ay ka mid tahay halbeegyada wax lagu cabbiro.

Taakada dadku waa ay kala dheer tahay.

Qofkee ayaa ugu taako dheer, qofkeese ugu


taako gaaban fasalkiinna?

Ma taqaan halbeeyo kale oo wax lagu cabbiro?

Layli:

1. Magacow saddex halbeeg oo wax lagu cabbiro?
2. Miiska aad wax ku dhigataa waa immisa taako?
3. Waa immisa tallaabo dhereka fasalkaagu?
4. Tallaabadaadu waa immisa taako?

Kala duwanaanta faraha



Weligaa farahaaga aad ma ugu fiirsatey?

Ma taqaan midda ugu dheer dhammaantood?

Middee ayaaa ku xigta xagga dhererka?

Fartee ayaa ugu gaaban dhammaantood?

Suulka iyo faryarada midkee ayaa gaaban?


Layli:

1. Farahaagu sida ay u kala dhaadheer yihiin u qaado kowaad, labaad, saddexaad, afraad, iyo shanaad, ka dibna far walba dhererkeeda khaanadda ku ku beegan ku qor calaamaddan (✓).

Magac farta	Dhererka faraha				
	Koowaad	Labaad	Saddexaad	Afraad	Shanaad
Suul					
Murdiso					
Far					
FaadumO					
Far-Yaro					

2. Farahaaga mid walba immisa xubnood ayaa ay ka kooban tahay?
3. Farahaaga mid waliba immisa meelood ayaa ay ka laabantaa?

Cagaha dadku ma isku mid baa?




Cagaha dadku waxa ay ku kala duwan yihiin siyaabo fara badan. Sheeg saddex ka mid ah waxyaabaha ay caguhu ku kala duwan yihiin?

Xidhiidh ma ka dhexeeyaa dhererka qofka iyo dhererka cagtiisa?

Layli:

1. Magacow laba qaybood oo cagtaada ka mid ah:
2. Meesha godan ee cagta xaggeeda hoose ku taal maxaa loo yaqaan?
3. Dadka buurbuurani had iyo jeer ma ka cago waaweyn yihiin dadka dhuudhuuban?

Ma dhaqso badan tahay?



Dhaqsuhu lagama maarmaan ayaa uu u yahay nolosheenna, Wax ka sheeg waxtarka dhaqsuhu innoo leeyahay? Gacantaada midig iyo tan bidix midkee ayaa dhaqso badan?


Labadaada lugood ma kala dhaqso badan yihiin, mise waa isku mid?

Layli:


La samee waxqabadkan kooxdaada, ka dibna ka jawaab su'aalaha hoose.

Lix arday oo kala ah afar wiil iyo laba gabdhood oo safan, gashanna dharka dugsiga hoose, iyaga oo is dabajooga oo uu midba midka ka horreeya fiirinayo.

1. Dadku ma ku kala dhaqso badan yahay waxqabadka?
2. Gabdhaha iyo wiilasha midkee ayaa dhaqso badan?
3. Dadka waaweyn iyo dadka yaryar midkee ayaa dhaqso badan



Dhaqsahaaga ma kordhin kartaa?




Feker deg-deg ah iyo waxqabad dhaqso ah ayaa looga baahan yahay ciyaaraha.

dhaqso badnaantu waxa ay badbaadin kartaa naftaada.



Layli:

La samee waxqabadkan kooxdaada, ka dibna ka jawaab su'aasha hoose.


1. Ku celcelinta waxqabadku ma kordhisaa dhaqsaha qofka.



Intee ayaa aad boodi kartaa?



Waa immisa taako bootintaada sare?



Immisa taako ayaa ay gaadhi kartaa bootintaada hoose?

Lug keliya ma ku ordi kartaa ?



Dadku waxa ay leeyihiin laba lugood.

Marka aan soconno ama ordayno waxa aan adeegsanaa lugaheenna. Lug keliya qofku ma ku ordi karaa ?

Layli:-

1. Intee in le'eg ayaa aad lug keliya ku ordi kartaa?
2. Labadaada lugood middee ayaa aad keligeed si fiican ugu ordi kartaa ?
3. Maxaa loo yaqaan marka uu qofku lug keliya ku ordayo?

Waxtarka labada indhood.



Dadku waxa ay leeyihiin laba indhood.

Indhuhu waxa inoo leeyihiin waxtar ballaadhan.


Indhaha la'aantood waxba ma arki karno.

Intee ayaa aad socon kartaa adiga oo indhaha isku haya

Layli:

1. Marka aad il keliya wax ku eegayso iyo marka aad labadaba wax ku eegayso midkee ayaa aad si fiican wax u aragtaa ?
2. Labadaada indhood ma isku si ayaa aad wax ugu aragtaa mise waa ay kala aragti fiican yihiin?

Intee ayaa aad dhinacyada wax ka arki karnaa?



Inta badan waxa aynu fiirinaa xagga hore.

waxa kale oo aynnu u baahanahay in aynnu fiirino dhinacyadeenna. Intee ayaa aad dhinacyada wax ka arki kartaa adiga oo aan qoortaada dhaqaajin

layli:

1. Xayawaanka oo dhan indhahoodu ma waxa ay wajiga kaga yaalin xagga hore, mise qaar ayaa ay dhinacyada xigaan ?
2. Xayawaanka ay indhahoodu xagga hore ku yaaliin iyo kan ay dhinacyada xigaan midkee ayaa aad dhinacyada wax uga arki kara

Xasuusta qofka



Waxyaabaha aynnu maalin walba aragno ama maqalno waa aynnu ilawnaa badankooda.

Immisa waxyaabood ayaa aad ka xasuusan tahay wixii aad saaka soo aragtay ama soo maqashay ?



Sawirkan aad ugu fiirso.

Ma yahay sawirkani midkii bogga hore ku yaallay?

Layli

1. Qofku waxa loo sheego iyo waxa uu sameeyo midkee ayaa uu aad u xasusan karaa?
2. Waxa aad dhawaan aragtay iyo wixii aad mar hore aragtey midkee ayaa aad si fiican u xusuusan tahay?
3. Ku celcelinta ma kordhisaa xasusta qofka ?

Madaxa dadka



Aduunyada waxa ku nool dad aad u fara badan


qof walba waxa uu leeyahay madax, indho, san iyo af.

Qof walba qofka kale waa uu ka duwan yahay.

Qof walba wajigiisu waxa uu leeyahay qaab gooni ah oo

ka duwan dadka kale.


Layli:



Immisa jeer ayaa uu dhererkaagu ku laabmayaa dhererka madaxaaga ?

Magac,	Da'da	Dhererka madaxa	Dhererka qofka oo dhan.	dhererka qofka dherrerka madaxa

Gacmaha qofka



Dadku waxa uu leeyahay laba gacmood. Gacanta qofku waxa ay ka kooban tahay xubno kala duwan Gacmaha dadku waxa ay ku kala duwan yihiin siyaabo badan.

Layli:

1. Sawir gacan xubnaheeda oo dhammi muuqdaan, ka dibna xubin walba magaceeda ku qor.
2. Maxaa loo yaqaan xubinta u dhaxaysa garabka iyo xusulka ?
3. Immisa meelood ayaa ay gacantaadu ka laabmi kartaa?

Dareemayaal.


midabka waxaa lagu gartaa arragga.



Wan: Maalin wanaagsan,
Magacayga waxaa la
yiraahdaa Warmooge.

Dawaco : Maalin wanaagsan
anna waxaa la i
yiraahdaa Daga.

Wan: Alla geed kani weynaa
oo cagaaranaa.



Dawaco : Weliba foodhi aad u
macaan ayaa uu
leeyahay.




Wan : Geedkani aad ayaa
uu uga duwan yahay
kii hore oo waxa uu
leeyahay miro hurdi ah.

Dawaco : Caleentiisuna waa ay
ka balbalaaran tahay.



Wan : Waa maxay waxan dhulka
yaallaa. Alla waa lafo ari.
Tolow maxaa keenay lafaha
Meeshan.

Wan : Tolow ma yahay geedkaasi
kii aan soo agmarnay. Haa,
waa isagii waayo waa kuwaa
mirihii hurdiga ahaa



Wan : Allaylehe geedkanna
waa aan garanayaa
oo waa kii gurigayaga
u dhowaa.

Layli:

1. Sheeg midabbada ugu caansan ee aad taqaan.
2. Adiga oo indhaha isku haya walxaha midabkooda ma garan kartaa ?
3. Sidee ayaa aad walxaha midabkooda ku garan kartaa ?
4. Walxahan mid walba midabka ay yeelan karto ku hoos qor.



Moos bisil



Dhuxul




Yaanyo Bisil



Xiddig

Walaxda qaabkeeda aragga ma lagu garan karaa ?




Wan: Alla waa maxay waxaan !

Dawacadii : Istaag.

Wan : Alla waa Daga !

Dawacadii : Soo bax, geedaha midabkooda ayaa aad jidka ku soo garatay sow ma aha?



Wan : Haddaba maxaa aan sameeyaa ?

Dhulkii waa mugdi oo dhirta midabkeeda lama arki karo.

Sidee ayaa aan jidkii ku gartaa ?



Wan:

Waa maxay waxaasi muuqdaa ?
Alleylehe waa dundumadii aan
maanta soo ag maray.




Wan:

Waa maxay waxa hadoodilani ?
Alla waa geedkii galoolka ahaa
ee gurigayaga u dhawaa.

Layli


1. Habeenkii dhirta midabkeeda ma la arki karaa ?
2. Sidee ayaa uu wanka yari markaan jidka ku gartay ?

Dareenka maqalka




Dawacadii:- Anna waa i kan.
In aad iga baxsan
kartid miyaa ay kula
tahay.

Dawacadii:- Ina mari, caawana
walxaha qaabkooda
ayaa aad u fiirsatay oo
jidka ku soo garatey
sow ma aha?



Wan:- Allaylehe caawa ayaa ay
iigu darantahay.
Labadii indhoodba waa
la iga xiray oo waxba ma
arki karo.
Sidee ayaa aan jidka ku
gartaa?




Wan: Waa maxay waxa sanqarayaa.

Waxa uu u sanqarayaa
sidi biyo meel sare ka
Soo shubmayaa.

Allaylehe waa biyihii
qarka ka soo shub-
mayey ee aan jidka
ku soo mernay.


Wan: Codka baxaya macaanaa
Halkee ayaa aan fooridan ka
maqlay hadd ka hor?
Alla haddaan gartay oo waa
geedkii galoolka ahaa ee
u dhawaa gurigayaga.



Layli:-

1. Xubintee ayaa loo adeegsadaa maqalka sanqaraha?
2. Sidee ayaa uu wanka yari markan jidka ku garta?

Dareenka Urta





Dawacadii: Waa yaab!
maantana ma
soo baxsatay?

Wankii: Alla maxaa i daba
dhigey tan?


Dawacadii:

Inna mari maantana
sidaad dhawaaqyada
u dhegaysanaysay
ayaa aad timid sow
ma aha?

Wallee dib uma soo
baxsatid.



Wankii: Maanta ayaa ay iigu
daran tahay, maqal iyo
arag midna ma jiraan.
Haddaba, maxaa tala ah?



Wankii: Allaa udgoonaa
halkee ayaa aan
ku soo maray urtan
Wa geedkii reexaanta
ahaa ee jidka gurigayaga
ku yaallay.



Ninkii: Yur yur yur yur
Dawacadi: Alla ma i seegay
wankii yaraa.
Wankii: Ilaaha ma iga
badbaadiyay tii?

Layli:

1. Sidee ayaa uu wanka yari markan jidka ku soo gartay?
2. Xubintee ayaa loo adeegsadaa si loo garto urta walaxda?

Dareenka taabashada



Adiga oo indhaha isku haya haddii zad walax
taabatid ma tilmaami kartaa astaamaheeda?



Haddii walax astaamaheeda laguu tilmaamo
taabasho ma ku garan kartaa adiga oo indhaha isku haya?

Layli:


Erayadan mid walba meesha ku habboon ku buuxi. Astaamaha, midabkeeda, urteeda, kulushahay, taabasho, qabowdahay.

1. Walaxda _____ taabasho laguma garan karo.
2. Walaxda in ay adag tahay iyo in ay jilicsan tahay waxaa lagu garan karaa oo keliya _____.
3. Walaxdu in ay _____ iyo in ay _____ waxa lagu garan karaa taabashada.
4. Walaxda _____ taabasho laguma garan karo.
5. _____ walxaha qaarkood taabasho la'aan lama garan karo.

Dareenka dhadhanka



Walxaha dhadhankoodu macaan, qaraar iyo dhanaan midka uu yahay waxa lagu garan karaa dhadhamada.



Dhadhanka walxuhu ma isku mid baa marka aad sanku is-qabatid iyo marka kale?

Layli:

Weedhahan midkii sax ah horteed ku qor calaamadda (✓),

middii khalad ahna ku hor qor calaamaddan (X)

1. Walaxdu macaan, dhanaan, iyo qaraar midk ay tahay waxa lagu garan karaa arragga (_____).
2. saddex koob oo ay ku kala jiraan biyo cusbo leh, biyo sonkor leh iyo biyo caadi ah waxa lagu kala sooci karaa dhadhamada (_____).
3. Marka aan wax dhadhaminayno waxa aan adeeegsannaa carrabka (_____).
4. Qofka wax dhadhaminayaa haddii uu sanku isku qabto wax isbeddel ah ma dareemo (_____).
5. Dhadhanku waxa uu u qaybsamaa macaan, qaraar iyo dhanaan (_____).

Naqtiin "Dareemayaal"



Dadku waxa uu leeyahay dareemayaal uu wax ku ogaado.

Dareemayaasha dadku waa shan.


Shanta dareeme waxa ay kala yihiin:

Dareenka aragga, dareenka maqalka, dareenka taabashada, dareenka dhadhanka.

Layli

Sawirrada hoose erayadan ku hor qorani sida ay

isku leeyihiin iskugu beeg.



Maqal




Dhachamo



Taabasho




Arag



Ursasho

Kala duwanaanta dhirta.

Dhirta deegaankeenna.



Deegaankeenna waxa ka baxda dhir fara badan.



Dhirtaasi wax ay leedahay astaamo kala duwan.

Dhirtaasi qaar waa la beertaa, qaarna lama beerto ee


iskood ayaa ay u baxaan.

Layli:

1. Magacow toban geed oo degmadiinna ka baxa.
2. Tiri afar astaamood oo geedka cambaha ah iyo geedka yaanyadu ku kala duwan yihiin.
3. Magacow afar geed oo qodax leh oo degmadiinna laga helo? Sawir laba geed oo aad maalin walba aragtid.



Dhirta oo dhan dadku ma cunaa?



Sawirkan waxa ka muuqda dhir kala duwan.

dhammaan dhirtani ma ka baxdaa degmadiinna?

Immisa ayaa dhirtan dadku cunaa?


Sheeg geed walba magaciisa.

Layli:-

Tusaha hoose dhirta ku qoran geed walba khaanadaha bannaan tan ku habboon ku qor calaamaddan (✓).

Geed	Waa la cunaa	Lama cuno
Digir		
Loos		
Garas		
Iiin		
Qumbe		
Qurac		
Booc		
Gob		
Yicib		
Reexaan		
Moxog		
Sisin		
Dareemo		

Qaybaha geedka.



Dhirta badankeedu waxa ay leedahay xididdo, jirrid, caleemo, ubax iyo miro. Xididdadu waa qaybta geedka ugu hooseysa ee dhulka ku aasan. Jirridu waxa ay ka baxdaa xididdada. Caleemaha geedku waxa ay ka baxaan jirrida. Halkee ayaa ay ubaxa iyo mirihu geedka kaga yaalliin?


Layli:

1. Erayadan mid walba weerta uu ku habboon yahay ku buuxi.


Xididku, Dhirta, Ubaxu, Jirrida.

- b) _____ badankeedu waxa ay leedahay xididdo,
jirrid, caleemo, ubax iyo miro.
- t) _____ waa qaybta geedka ee dhulka ku aasan.
- j) Caleemuhu waxa ay ka baxaa _____ geedka.
- x) _____ waa qaybta geedka ugu qurux badan.

2. Sawir ku muuji geed ay dhammaan qaybihisu
muuqdaan, qayb walbana magaceeda ku qor.



Shaqada qaybaha geedka.



Xididdadu geedka ayaa ay dhulka ku hayaan.

Xididdadu geedka ayaa ay macdanta iyo biyaha

dhulka uga soo nuugaan.

Jirriddu caleemaha iyo ubaxa ayaa ay kor u haysaa.

Jirriddu cuntada iyo biyaha ayaa ay caleemaha u geysaa.

Iniinyuhu waa qaybta geedku ku tarmo.

Layli:

1. Erayadan mid walba weerta uu ku habboon

yahay ku buuxi:

Macdanta, Caleemaha, Biyaha, Xididdadu,

Jirrida, Iniinyo.

b) _____ geedka ayaa ay dhulka ku hayaan.

t) Xididdadu waxaa ay dhulka ka soo nuugaan

_____ iyo _____.

j) Jirridu _____ ayaa ay kor u haysaa.

x) Caleemaha macdanta iyo biyaha waxa u keena

_____.

kh) Qaybta geedku ka tarmo waxaa loo yaqaanaa _____


2. Sharax kooban ma ka bixin kartaa waxtarka ay xididdada, jirrida iyo iniinyuhu u leeyihiin geedka.

Dhirtu waxa ay isla beddeshaa xilliyada



Wagtiga roobka ah ee dhulku barwaaqada yahay dhirtu aad ayaa ay u qurux badan tahay, midabkeedu waa cagaar, ubaxyo kala duwan ayaa ay leedahay.

Wagtiga abaarta ah dhirtu waa ay qalashaa, waqtiga abaarta dhirtu midabkeedu waa uu isbeddelaa, caleentuna waa ay ka daadataa.



Layli:

Weeraha soo socda mid walba waxa ku hor qoran laba eray. Ku buuxi weer walba meesha bannaan ereyga ku habboon.

1. Waqtiga abaarta ah caleenta dhirtu waxa ay noqotaa _____ (qoyaan, qallayl).


2. Waqtiga roobka ah midabka caleenta dhirtu waa _____ (cagaar, hurdi).

3. Xilliga abaarta ah dhirta caleentu (waa ay ka daadataa, kama daadato).

4. Dhirtu aad ayaa ay u qurux badan tahay xilliga _____ ah (abaarta, roobka).

5. Dhirtu waxa ay bixisaa ubaxyo kala duwan xilliga _____ ah (roobka, abaarta).

Adkaysiga dhirta



Dhirta deegaankeenna ka baxdaa waa ay kala adkaysi badan tahay. Dhirtaasi qaarkeed aad ayaa ay ugu adkaysataa biyo la'aanta. Dhirtaasi qaar kalena aad ayaa ay ugu nugul yihiin biyo la'aanta.


Layli:

Dhirta ku qoran tusaha hoose mid walba khaanadda

ku haboon ku qor callaamaddan (✓).

Geed	Wuu u adkaystaa biyo la'aanta	Uma adkeysto biyo la'aanta
Galley		
Xaskul		
Tiin		
Maseggo		
Galool		
Babaay		
Yaanyo		
Dacar		
Sisin		
Moos		
Qurac		
Digir		
Caday		
Bariis		

'Naqtiin" Kala duwanaanta dhirta.



Sawirkan waxa ka muuqda dhir kala duwan

Dhammaan dhirtani waxa ay ka baxdaa dalkeenna.

Ma taqaan dhirtan magacyadooda?

Immisa ayaa ka baxda degmadiinna?

Sheeg dhirtan geed walba midka kale waxa uu

kaga duwan yahay.

Layli:

Weerahan soo socda midda sax ah ku hor qor

calaamaddan (✓), tii khalad ahna ku hor qor

calaamadda (x).

1. Dhirta dalkeenna ka baxdaa dhammaan waa

isku nooc (_____).

2. Dhirta dalkeenna ka baxdaa waa ay kala waaweyn

tahay (_____).

3. Qaybta geedka ugu hooseysa waxa loo yaqaan

Jirrid (_____).

4. Qaybta geedka macdanta iyo biyaha dhulka

uga soo nuugta waxa loo yaqaan xidid (_____).

5. Jirriddu caleemaha iyo ubaxa ayaa ay kor u

haysaa(_____).

6. Dhirta oo dhammi isku si ayaa ay ugu adkaysataa


biyo la'aanta (_____).

7. Midabka caleenta dhirtu waxa uu isla beddelaa

xilliyada(_____).

Cunto

Cuntada dadka



Dadku waa noole.

Dadku waxa uu u baahan yahay cunto si uu u noolaado.

Dadku waxa uu cunaa cunto uu ka helo noolaha kale

sida dhirta iyo xayawaanka.

Magacow qaar ka mid ah noolayaasha dadku cuntadiisa ka helo.

Xusuuso wixii aad shaley cuntay. Maxaa ay ahaayeen?

Sheeg inta dhir ka timid iyo inta xayawaan ka timid.

Layli:-

Tusaha hoose ku qor magacyada shan cunto oo aad maallin walba cuntid. Haree khaanadaha tusaha, si aad u muuji- sid cunta walba inta jeer ee aad todobaadkiiba cuntid

Inta jeer ee aad todobaadkiiba cuntid

18					
17					
16					
15					
14					
13					
12					
11					
10					
9					
8					
7					
6					
5					
4					
3					
2					
1					

nooca cuntada.

Cuntada waxa laga helaa tamar:




Maalin walba waxa aynu qabannaa hawlo fara badan oo kala duwan. Kubbad ayaa aynu ciyaarnaa. Waa aynu soconnaa. Si aynu hawlahaas u qabanno waxa aynu u baahan nahay cunto.

Layli:


1. Marka aad gaajaysan tahay iyo marka aad dheregsan tahay midkee ayaa aad wax qaban kartaa?
2. Adiga oo daallan haddii aad shaah cabtid maxaa aad dareentaa?
3. Cunto la'aan wax ma baran kartaa?

Cunto dheellitiran




Cunto kala jaad ah ayaa aynu cunaa. cuntooyinka qaarba shaqo ayaa ay qabtaan. Cuntooyinka qaar ayaa jirku ku koraa. Cuntooyinka jirku ku koro waxa ka mid ah hilibka xoolaha, ukunta, kalluunka, caanaha iyo digirta.

Cuntooyinka qaar ayaa caafimaadka qofka ilaaliya oo cudurrada ka celiya. Cuntooyinkaas waxa ka mid ah, yaanyada, liinta, dabacasaha, mooska iyo kaabashka.



Cuntooyinka qaar ayaa jirku ku shaqeeyaa. Cuntooyinkaas waxa ka mid ah: rootiga, bariiska, baastada, bataatiga iyo soorta. Haddaba si aad u kortid, u caafimaad-qabtid, una shaqeysan kartid, waa inaad cuntaa cunto dheellitiran.



layli:

Tusaha hoose waxa ku qoran cuntooyin kala duwan.

Cuntooyinka mid walba waxa ka horreeya saddex khaanadood oo maran. Cunto walba khaanadda ku habboon ku qor calaamaddan ().

Cunto	koritaanka jirka	caafimaadka jirka	waxqabadka jirka
Cambe			
Canjeero			
Digir			
Hilib			
Yaanyo			
Canab			
Ukun			
Sabuul			
Bataati			
Liin			
Kalluun			
Caano			
Moos			
Bariis			

Silsiladda Cuntada




Dhulka waxa ka baxa dhir kala duwan.

Dhirtaa waxa ka mid ah galleyda.



Digaaggu waxa uu u baahan yahay cunto.

Cuntada digaagga waxa ka mid ah galleyda.



digaaggu waxa uu leeyahay hilib la

cuno. Digaaggu waxa uu dhalaa ukun.

Dadku waxa uu u baahan yahay cunto.

Cuntadaas qaarkeed waxa uu ka helaa

digaagga.



Layli:

1. Erayadan mid walba meesha ku habboon ku buuxi:

Silsiladda, cunto, carrada, dhirta, dhinto.

b) Xayawaanku.....ma samaysto.

t) Xayawaanku waxa uu cunaa.....iyo xayawaanka kale.


j) Dhirtu.....ayaa ay ka baxdaa.

x) Xayawaanku marka uu.....carrada ayaa uu ka mid noqdaa


kh) Wareegga ay soo marto cuntada aan cunnaa

waxa loo yaqaan.....cuntada.

2. Sawir wareegga ay soo maraan caanaha aynu cabnaa.




Sidee ayaa uu xayawaanku cuntadiisa ku helaa?



Sawirkan waxa ka muuqda xayawaanno kala duwan.

Xayawaannadan mid walba maxaa uu sameynayaa?



Xayawaannadan mid walba xubnahee ayaa uu adeegsadaa si uu


cunto u helo?

Layli:

Weeraha soo socda middii sax ah horteeda ku qor
calaamaddan (), middii khalad ahna horteeda ku
qor calaamaddan (X).

1. Bisaddu waa ay gaaddaa xayawaanka ay ugaarsanayso
2. Rahu waxa uu adeefsadaa lugihiisa mar uu ugaarsanayo ().
3. Shimbiraha qaarkood waxa ay adeegsadaan lugahooda si ay cunto u helaan ().
4. Kalluunku lugaha ayaa uu ku qavsadaa xayawaanka ugaarsanayo ().
5. Caaradu dabin ayaa ay dhigtaa si ay cunto u hesho
6. Xayawaannada qaarkood waxa ay cuntadooda ku heli karaan urinta ().
7. Masasku ciddiyahooda ayaa ay adeegsadaan si ay u qabsadaan xayawaanka ay ugaarsanayaan ().

Xayawaanku waa uu is ilaaliyaa



Xayawaanka qaarba qaar ayaa uu cadaw u yahay.


Xayawaanku cadowgiisa siyaabo kala duwan ayaa uu iskaga ilaaliyaa. Xayawaannada qaarkood waxa ay isku ilaaliyaan ciddiyo dhaadheer iyo miciyo. Libaaxu waxa uu leeyahay ciddiyo dhaadheer. Ciddiyihiisa ayaa uu cadawga iskaga ilaaliyaa. Magacow xubin kale oo uu libaaxu adeegsado marka u dagaallamayo.

Layli:

Xayawaannada tusaha hoose ku qorani siyaabo kala duwan ayaa ay cadawga iskaga ilaaliyaan. Mid walba khaanadda ku habboon ku qor calaamaddan (✓).

xayawaan	Ciddiyo	Ilko	Qolof	Sun	Gees	Orod
Bisad						
Diin						
Mas						
Dibi						
Awr						
Shabeel						
Xaaxeeyo						
Libaax						
Waraabe						
Ey						
Dabaqallooc						
Biciid						
Dhirtaxanyo						
Wiyil						
Gorayo						



Dhirta qaarbaa is ilaaliya



Xayawaan badan baa cuna dhirta.
Dadkuna waxa uu cunaa dhirta qaarkeed.
Labaduba waa u cadow dhirta.
Sidee ayaa ay dhirtu isaga dhicisaa cadawgeeda?


Dhirta qaar baa leh qodxo.

Xayawaanka badankoodu ma cunaan dhirta qodaxda leh. Waayo?
Magacow dhirta qodaxda leh ee degmadiina ka baxda.



Dhirta qaar baa leh dheecaan qaraa.
Xayawaanku ma jecla in ay cunaan dhirtaas.
Magacow dhirta noocaas ah ee Degmadiina ka baxda. Sheeg siyaasaha kale ee ay dhirtu cadawgeeda iskaga ilaaliso.

Sidee ku habboon in wax loo cuno?



Waxa aan wax ku cunaa qalab nadiif ah oo biyo iyo saabuun lagu dhaqay. Inta aanan wax cunin gacmahayga waxa aan ku nadiifiyaa biyo iyo saabuun.

Marka aan wax cunayo si deggan ayaa aan wax u cunaa.
Marka cuntadu afka iigu jirto ma hadlo.



Marka aan wax cunayo si fiican ayaa aan u calaliyaa.



Marka aan dhammaysto cuntada gacmaha waxa aan ku dhaqdaa biyo nadiif ah.

Naqtiin "Cunto"



Cuntada lagama maarmaan ayaa ay u tahay nolosha xayawaanka Cuntadu waxtar kala duwan ayaa ay u leedahay xayawaanka. Xayawaanku siyabo kala duwan ayaa uu cuntadiisa ku helaa.

Layli

1. Sheeg saddex waxtar oo ay cuntadu innoo leedahay.
2. Sheeg afar siyaabood oo ay xayawaannadu cadowgooda iskaga ilaaliyaan.
3. Halkee ayaa ay ka timaadaa cuntad aynnu cunnaa ?

Dhaqsaha Neefsashada



Dadku waxa uu u baahan yahay neefsasho si uu u noolaado. Immisa jeer ayaa aad halkii daqiiqo neefsataa?

Magacaaga	inta jeer ee aad neefsatid halkii daqiiqo.

Maxaa xukuma dhaqsaha neefsashada ?




Had iyo jeer qofku waxa uu u baahan yahay in uu neefsado.

Qofka neefsashadiisu ma is beddeshaa ?

Qofka marka uu dhaqdhaqaaq badan sameeyo waxa ku dhaca isbedel.

Qofka waa dhididaa, daalaa,

neefsashadiisuna waa ay is beddeshaa.



Qofku marka uu fadhiyo iyo marka uu dhaqdhaqaaq badan sameeyo midkee ayaa neefsashadiisu badan tahay?




Layli:

Marka aad nasatid iyo marka aad wax badan boodboodid midkee ayaa neefsashadaadu badan tahay ?

Magac	dhaqsaha neefsashada qofka oo fadhiya	Dhaqsaha neefsashada boodboodka ka dib

Xubnaha neefsashada



Noolaha oo dhammi waxa uu u baahan yahay hawo.
Hawada waa aynu neefsannaa. Hawadu si isdhaaf ah
ayaa ay jirkeenna u gashaa, ugana soo baxdaa.

Layli:

1. Sheeg laba xubnood oo ay hawada jirkeenna ka gasho
marka aynu neefsanano.
2. Xubnaha ay hawadu jirkeenna ka gasho iyo kuwa ay ka
soo baxdaa ma isku midbaa marka aynu neefsanayno?
3. Sawir xubnaha neefsashad ee dadka.
kuna muuji xubin walba magaceeda.

Habdhaca neefsashada.



Marka aynnu neefsanayno hawo ayaa aan qaadanaynaa
soona celinaa. Wax isbeddel ahi ma ku dhacaa laabteenna
marka aynnu neefsanayno?

Layli:

1. Maxaa ku dhaca feerahaaga marka aad hawada qaadanaysid?
2. Marka aad hawada qaadanaysid iyo marka aad soo
celinaysid midkee ayaa laabtaadu kala baxdaa?
3. maxaa aad dareentaa marka aad cabbaar neefta isku celisid?


Naqtiin "Hawo"




Hawadu lagama maarmaan ayaa ay nolosheenna u tahay. Hawada waa aynnu neefsannaa. Hawada waxa ay jirkeenna ka gashaa afka iyo sanka, ka dibna waxa ay tagtaa sambabada.

Maxaa ku dhaca laabtaada marka aad hawada qaadanaysid?

Hawadu waxa ay ka soo baxdaa sanka iyo afka marka aynnu neefsanayno. Si dhaqso badan ayaa aan hawada u qaadannaa una soo celinaa marka aynnu neefsanayno. maxaa ku dhaca laabtaada marka aad hawada soo celinaysid?



Biyuhu waa hoor



Deegaankeenna waxa laga helaa hoorar kala duwan.

Hoorku waxa uu yeeshaa had walba qaabka weelka uu ku jiro.

Biyuhu waa hoor. Biyuhu waxa ay leeyihiin astaamaha hoorka.


Magacow hoorarka kale ee deegaankeenna laga helo.

Layli

Hoorarka tusaha hoose ku qoran mid walba astaamaha uu leeyahay khaanadaha ku beegan ku qor calaamaddan (✓) astaamaha aanu lahayna calaamadan (X).

Hoor	qaabsugan	Mug	Midab	Ur	Qoyan
Fuud					
Saliid					
Biyo					
Caano					
Malab					
Gaas					
Shaah					
Batroot					
Faanto					
Dhiig					
Khad					

Ilaha Biyaha



Biyaha lagama maarmaan ayaa ay u yihiin nolosha xayawaanka iyo dhirta. Biyaha aynnu u baahannahay waxa aynnu ka helnaa meelo kala duwan. Roobku waa meesha ugu badan ee aan ka helno biyaha aan u baahan nahay.

Layli:

1. Magacow saddex ka mid ah meelaha biyaha laga helo deegaankiinna?
2. Magacow laba maalmood oo biyaha laga helo oo dadku sameeyey iyo laba dabiici ah?
3. Sharax sida biyaha aad gurigiina ku cabtaan idiinku yimaadiin.

Jirkeenna biyo ma ku jiraan?




Maalin walba waxa aan cabnaa biyo aad u fara badan. Caanaha, shaaha, iyo cuntada aynnu cunno dhammaan waxa ku jira biyo. Biyahaas oo dhammi waxa ay galaan jirkeenna. Maalintii immisa ayaa aad wax cabtaa?

Magac	Biyo	Shaah	Caano	Cabitaan kale

layli:

1. Sheeg saddex waxyaabood oo ku tusaya in jirkeenna biyo badani ku jiraan?
2. Sidee ayaa ay biyahaasi jirkeenna ku galaan?
3. Dhiigga jirkeenna ku jira wax biyo ahi ma ku jiraan?
4. Sheeg saddex siyaabood oo ay biyuhu jirkeenna dibadda ugaga baxaan?
5. Haddii biyaha jirkeenna ku jira ka dhammaadaan maxaa dhacaya?
6. Jirka xayawaanka kale wax biyo ahi ma ku jiraan sida dadka?

Caanaha biyo ma ku jiraan.




Dadku waxa uu cabbaa caano. Caanaha waxaa loo cabbaa sida biyaha. Caanaha biyo ma ku jiraan?

Layli


1. Sheeg waxyaabaha ku dhaca caanaha marka ay muddo dheer meel yaalliin?
2. Caanaha lo'da iyo caanaha geela kuwee ayaa biyo badani ku jiraan?
3. Sheeg sadex walxood oo aynnu cabno oo ay biyo ku jiraan?

Naqtiin guud



Dadku waxa uu leeyahay astaamaha xayawaanka.

Dadku waxa u leeyahay astaamo uu wadaago iyo kuwo uu ku kala duwan yahay.




Deegaankeenna waxa ku nool xayawaanno fara badan.

Xayawaannadaasi waxa ay ku kala duwan yihiin xagga qaabka, baaxadda, koritaanka, dhalmada iyo waxa ay cunaan.

Dhir fara badan ayaa ka baxda dalkeenna. Dhirtaasi waa ay kala duwan tahay. Maxaa ay ku kala duwan tahay dhirtaasi?

Nuugidda Biyaha



Marka aynnu rootiga cunayno waxa aynnu ku darsannaa shaah. Shaahu rootiga ayaa uu innoo jilciyaa.

Rootigu shaaha ayaa uu nuugaa. Bariiska waxa lagu kariyaa biyo. Bariisku biyaha waa uu gursadaa.


Bariisku biyaha waa uu nuugaa.

Layli

Walxaha tusaha hoose ku qoran u kala saar kuwa biyaha aad u nuuga, kuwa dhexdhexaad ah iyo kuwa wax yar nuuga adiga oo mid walba khaanadda ku habboon ku qoraya calaamaddan (✓).

	aad biyaha - u nuuga	dhexdhexaad	Wax yar nuuga
Rooti			
Digir			
Cudbi			
Galley			
Canjeero			
maro			
Alwaax			
Warqad			
Bariis			
Baasto			

Radintu ma beddeshaa dhaqsaha cunto karinta




Cuntada waxa aynnu ku karsannaa biyo. Biyahu Cuntada waa ay jilciyaan marka lagu kariyo. Biyuhu waxa ay dhexgalaan cuntada marka lagu kariyo. Maxaa ku dhaca digir haddii muddo dheer biyo lagu radiyo?


Layli:

1. Sheeg afar walxood oo biyaha nuuga.
2. Halkee ayaa ay maraan biyaha bariiska lagu kariyaa marka uu bislaado?
3. Sheeg isbeddelka ku dhaca bariiska haddii muddo dheer biyo lagu radiyo?
4. Digir biyo lagu radiyey iyo mid caadi ah haddii isku mar dab la saaro midkee ayaa hor bislaanaya?
5. Digir biyo lagu radiyey iyo mid caadi ah middee ayaa dhuxul badan u baahan si loo kariyo?

Biyuhu wax ayaa ay milaan.



Nin ayaa waxa uu lahaa dameer aad u caqli badan oo uu cusbo ku raran jiray.



Dameerkii oo keligii socda ayaa waxa uu arkay balli biyo ah.

Dameerkii waxa uu ku dhacay biyihii isaga oo ka cab is leh.




Markii uu dameerkii biyihii ka soo baxay waxa uu dareemay fudayd aad ayaana uu u socday.

Layli

Walxaha tusaha hoose ku qoran u kala saar kuwa sabbeeya iyo kuwa dega adiga oo mid walba khaanadda ku habboon ku qoraya calaamaddan (✓).

Walax	Sabbeysaa	ma sabbayso (degtaa)
Doon		
Musmaar		
Qalin rasaas		
Dhagax		
Daasad maran		
Kubbad		
Irbad		
Loox		
Shilin		
Baal		

Sabbaynta Walxaha



Weligaa ma aragtay markab. Markabku waxa uu maraa biyaha dushooda.

Markabku waxa uu ka samaysan yahay bir.


Markabka iyo musbaarku waxa ay ka wada sameysan

yihiin bir. Maxaa uu markabku u sabbeeyaa, musbaarkuna u degaa?

Layli:

1. Dameerku intii aanu biyaha dhexgelin iyo markii uu ka soo baxay midkee ayaa uu culays badan siday?
2. Maxaa uu dameerku fudayd u dareemay markii uu biyaha ka soo baxay?
3. Haddii aad in yar oo cusbo ah koob biyo ah ku dhex ridid ee aad ku walaaqdid qaaddo, maxaa ku dhacaya cusbadii?
4. Sheeg laba walxood oo biyaha ku milma?
5. Sheeg shan walxood oo aan biyaha ku milmin?

Meertada biyaha



Dhulka korkiisa waxa ku yaal bado, balliyo, webiyo iyo haro biyo ka buuxaan. Xaggee waxaas oo biyo ah ka yimmaadaan?

Haddii aad weel biyo ku jiraan muddo dheer meel qorax ah dhigto biyuhu waa ay dhammaadaan. Xaggee ayaa ay tegeen biyahaasi?

Layli:-

Weeraha soo socda middii run ah waxa aad ku hor qortaa calaamaddan (✓), tii been ahna wax aad ku hor qortaa calaamaddan (X).

1. Biyaha ku jira balliyadu waxa ay ka yimaadaan roobka ().
2. Biyaha ku jira baaliyadu ma uumi baxaan mark ay qorraxdu ku dhacdo ().
3. Roobku waxa uu ka yimaaddaa daruuraha samaysma marka biyaha badaha, togogga, iyo balliyadu uumi baxaan ().
4. Haddii aan biyaha badda, togogga iyo ballayadu uumi bixin roob ma da'een ().
5. Meertada biyuhu waa wareegga ay sameeyaan biyuhu laga bilaabo biyaha dhulka ee uumi baxaya ilaa roobka daruuraha ka yimaada ().

Waxtarka iyo waxyeellada biyaha



Biyuhu waxa ay kaalin weyn ka qaataan nadaafadda guud.

Biyaha weelasha ayaa aynu ku Nadiifsannaa, maryaha waa aynu ku dhaqannaa.

Faa'iidada ugu weyn ee ay biyuhu innoo leeyihiin waxa weeye cabitaanka. Biyaha dadka iyo xooluhuba waa ay cabbaan.




Biyuhu mararka qaarkood waxa ay innoo leeyihiin waxyeello, sida daadadka xoogga leh iyo roobka badan, kuwaas oo guryaha burburiya, beerahana baabi'iya.

Layli:

1. Sheeg afar waxtar oo ay biyuhu innoo leeyihiin.
2. Sheeg saddex wayeello oo ay biyuhu innoo leeyihiin.
3. Haddii aan muddo dheer roobab di'in maxaa dadka, xoolaha iyo dhirta ku dhaca?
4. Biyaha iyo raashinka kale midkee nolosha ku muhiimsan?
5. Biyaha, dharka iyo weelka ma ahee maxaa kale oo aynnu ku nadiifsannaa?
6. Biyo la'aan noloshu ma jiri kartaa?

Naqtiin "biyo"




Biyuhu waa hoor. Biyuhu waxa ay leeyihiin astaamaha
hoorka. Biyuhu lagama maarmaan ayaa ay u yihiin nolosha.
Biyuhu waxtar ayaa ay noolaha u leeyihiin.

Layli:

1. Magacow afar hoor oo laga helo deegaankiina?
2. Sheeg laba astaamood oo uu hoorku adkaha kaga duwan yahay?
3. Sheeg laba astaamood oo ay biyuhu la wadaagaan hoorarka kale?
4. Magacow laba walxood oo biyaha ku milma iyo laba aan ku milmin?
5. Walxaha oo dhammi biyaha ma sabbeeyaan?
6. Haddii biyo la waayo maxaa dadka iyo xoolaha ku dhacaya?

Carro

Noocyada carrada




Dhulka korkiisa waxa laga helaa waxyaabo kala duwan sida dhir, dhagxaan iyo carro. Carrada dhulka laga helaa waa ay kala duwan tahay.

Layli

1. Sheeg saddex walxood oo dhulka korkiisa laga helo?
2. Carrada dhulka laga helaa dhammaan ma isu midbaa?
3. Sheeg laba astaamood oo uu bataaxu kaga duwan yahay carrooyinka kale?
4. Bataaxa iyo carro-Madowda midkee ayaa biyaha muddo dheer hayn kara?
5. Bataaxa iyo Carro-Madowda midkee ayaa hor qallala marka roobku ku da'o

Carradu Maxaa ay ka Samaysan tahay?



Dhagxaanta dhulka korkiisa laga helaa waa ay burburtaa.

Dhagxaantu marka ay burburto waxa ay noqotaa carro. Carradu ma dhagxaanta burburtay oo keliya ayaa ay ka sameysan tahay?

Layli:

Erayadan mid walba meesha uu k habboon yahay

ku buuxi: Darsamaa, kala, Carrada, rogaan, Digada.

1. Dhagxaantu marka ay burburto waxa ay mid noqotaa _____

2. Carradu waxa ay ka samaysan tahay waxyaabo _____ duwan.

3. Xayawaanku marka uu dhinto waxa uu ku _____ carrada.

4. Caleemaha dhirta ka daataa waxa ay isku _____ carro.

5. Waxyaabaha Carrada ka sameysan tahay waxa ka mid ah _____ Xoolaha.

Carradee ayaa ku habboon waxbeerashada?





Carrada dhulka korkiisa laga helaa waa ay kala duwan tahay. Carrada qaarkeed waxa ay ka samaysan tahay caleemo burburay, xayawaanno dhintay iyo waxyaabo kale. Waxyaabahaas ka yimaadda waxa nool waxa loo yaqaan Huyuumas. Carrada huyuumaska leh ayaa ay dhirtu si wanaagsan ugu baxdaa.

Layli:

Weeraha soo socda middii sax ah ku hor qor calaamaddan (✓), middii khalad ahna calaamaddan ().

1. Carrada dhulka korkiisa laga helaa dhammaan waa isku nooc ().
2. Carrooyinku waa ay ku kala habboon yihiin waxbeerashada ().
3. Waxyaabaha ka yimaadda dhirta iyo xayawaanka ee carrada ku jira waxa loo yaqaan huyuumas ().
4. Carrada huyuumaska lihi kuma habboona wax beerashada ().
5. Bataaxu waa carrada ugu habboon wax beerashada.

Waxtarka Carradu u leedahay Xayawaanka



Carradu waxtar kala duwan ayaa ay xayawaanka u leedahay. Xayawaanka qaarkood baa carrada dhexdeeda ku nool, waxaa ka mid ah dirxiga. Xayawaanada qaarkood hoy ayaa ay ka samaystaan carrada, waxaa ka mid ah aboorka. Sheeg waxtarka kale ee ay carradu xayawaanka u leedahay?

Layli:-

1. Sheeg laba waxtar oo carradu u leedahay xayawaanka.
2. Tiri xayawaannada carrada dhexdeeda ku nool ee deegaan-kiina laga helo.
3. Sheeg afar qalab oo aynu carrada ka samaysanno.
4. Magacow afar xayawaan oo carrada hoy ka dhigta.
5. Carro la'aan xayawaanku cunto ma heli karaa?

Carro guurka maxaa dhaliya?



Carrada dhir ayaa ka dulbaxda oo qarisa. Marka dhirta la gooyo ama la gubo, carradii waa ay soo baxdaa.


Marka meeshii roob ku da'o biyihii aad ayaa ay u socdaan oo carradii sare ee fiicnad ayaa ay qaadaan. Marka ay biyuhu meesha carrada ka qaadaan waxaa ka samaysma bohola iyo togag, dhirtuna kama bixi karto.

Meeshaas waxaa la yiraahdaa waa ay carro guurtay.

Layli:

1. Sheeg laba waxyaabood oo carro-guurk dhaliya?
2. Meesha Carro-guurka ku dhaco sidee ayaa ay noqotaa?
3. Meesha Carro-guurka ku dhaco dhirtu si fiican ma uga bixi kartaa?
4. Meesha dhirta leh iyo dhulka bannaan midkee ayaa uu carro guurku sahal ugu dhici karaa?
5. Meesha siman iyo dhulka janjeera midkee ayaa ay biyuhu sahal carrada u qaadi karaan?

Naqtiin "Carro"



Carradu ahmiyad weyn ayaa ay u leedahay nolosheenna.


Cuntada aynu cunaa waxa ay ka baxdaa carrada.

Carrada waxa aynu ka samaynaa qalab kala duwan.

Sheeg waxtarka kale ee ay carradu u leedahay xayawaanka.

Guryaha aan dhisanno.

Noocyada Guryaha.



Dadku waxa ay u baahan yihiin guryo ay degaan.

Dadku waxa ay dhistaan guryo kala duwan. Guryahaasi


qaarba waxa ay leeyihiin waxtar gooni ah. Guryahaasi

qaarkood meelo gooni ah ayaa laga dhistaa.

Layli:

1. Sheeg magacyada afar nooc oo ka mid ah guryaha laga dhiso. dalkeenna
2. Sheeg laba waxyaabood oo uu guriga daarta ahi kaga duwan yahay cariishka?
3. Maxaa ay dadka reer guuraaga ahi u dhisan waayeen guryo daaro ah?
4. Sheeg laba faa'iido oo ay guryuhu u leeyihiin nololsha dadka.
5. Sawir saddex nooc oo ka mid ah guryaha degmadiina laga dhiso.

Gurigiinnu maxaa uu ka dhisan yahay?



Dadku waxa uu dhistaa guryo kala duwan. Guryahaasi waxa ay ka samaysan yihiin qalab kala duwan. Qalabkaasi mid walba meel gooni ah ayaa uu ka galaa dhismaha guriga. Qalabkaasi mid walba waxtar gooni ah ayaa uu u leeyahay dhismaha guriga. Qalabkaasi mid walba waxtar gaar ah ayaa uu leeyahay dhismaha guriga.


Layli:

Weeraha soo socda mid walba meesha bannaan ku buuxi eray ku habboon.

1. Gurigayagu waa _____
2. Gurigayagu waxa uu ka samaysan yahay _____
iyo _____
3. Guriga daarta ahi waxa uu ka samaysan yahay _____
iyo _____
4. Sibirka waxaa loo mariyaa guriga si uu u _____
5. Guriga cariishka ahi waxa uu ka samaysan yahay _____

_____, _____, _____ iyo _____

Qaabka Guryaha.



Guryaha dadku dhistaan aad ayaa ay u kala duwan yihiin, guryahaas qaarba waxa ay leeyihiin qaabgooni ah.

Layli:

1. Sheeg laba siyaabood oo ay ku kala duwan yihiin qaabka guriga carishka ah iyo aqal soomaaliga.
2. Sheeg guri dhinacyadiisu afar gees yihiin.
3. Sheeg guri hoostiisu ay tahay goobo.

Waxtarka Guryaha




Guryuhu lagama maarmaan ayaa ay u yihiin nolosha dadka.

Waxtar kala duwan ayaa ay guryuhu u leeyihiin nolosheenna

Layli:

1. Sheeg saddex waxtar oo ay guryuhu dadka u leeyihiin.
2. Sheeg saddex dhibaato oo ku dhacda dadka haddii aanay guri lahayn.
3. Alaabta dadku isticmaalaan halkee ayaa lagu xafidaa?

Xayawaanku hoy ma u baahan yahay.




Xayawaannada kale sida dadka ayaa ay hoy u baahan yihiin.

Hoygu waxtar kala duwan ayaa uu u leeyahay xayawaanka.

Layli:

1. Magacow saddex xayawaan oo hoy u baahan.
2. Sheeg laba waxtar oo hoygu xayawaanka u leeyahay.
3. Maxaa ku dhacaya xayawaanka haddii uu hoy waayo?

Xayawaannadu ma iyaga ayaa samaysta hoygooda:



Xayawaannada qaarkood iyaga ayaa hoygooda samaysta.
Xayawaannada qaarkoodna waxa ay galaan hoy xayawaan
kale diyaarsadey. Xayawaanka dabjoogga ah dadka ayaa u
sameeya hoyga ay u baahan yihiin. Tusaale ka bixi nooc
kasta oo ka mid ah xayawaannada sare.

Layli:

Weeraha soo socda middii sax ah horteeda ku qor calaamaddan
(✓), middii khalad ahna horteeda ku qor calaamaddan(x)

1. Xayawaanka oo dhammi iyaga ayaa samaysta hoygooda ()
2. Xayawaannada qaarkood waxa ay galaan hoy xayawaan
kale diyaarsaday ().
3. Xoolaha aynnu dhaqannaa iyaga ayaa samaysta
hoygooda ().
4. Xayawaannada qaarkood hoygooda waxaa u dhisa dadka
().
5. Xayawaannada duurjoogta ah dadka ayaa u dhisa
hoygooda ().

Naqtiin "Hoyga xayawaanka"














Dhaqdhaqaaqa

Dhammaan walxuhu dhaqdhaqaaq ma samaynkaraan?




Degaankeenna waxa laga helaa walxo kala duwan.

Walxahaasi qaarkood waxa ay samayn karaan dhaqdhaqaaq, qaarna dhaqdhaqaaq ma samayn karaan, walxahaasi qaarkood iskood ayaa ay u dhaqdhaqaaqaan, qaarna waa la dhaqaajiyaa.

Layli:

1. Sheeg toban walxood oo degaankiina laga helo.
2. Sheeg shan walxod oo dhaqdhaqaaq samaynkara iyo shan walxood oo aan samayn karin dhaqdhaqaaq.
3. Tiri shan walxood oo iskood dhaqdhaqaaq u samayn kara.
4. Tiri shan walxood oo u baahan in la dhaqaajiyo si ay u socdaan.
5. Sawir laba walxood oo dhaqdhaqaaq samayn kara iyo laba aan samayn karin dhaqdhaqaaq.

Immisa dhaqdhaqaaq ayaa aad samayn kartaa?




Dadku waa xayawaan. Xayawaanku waxa uu sameeyaa dhaqdhaqaaq. Dadku waxa uu sameeyaa dhaqdhaqaaqyo kala duwan.

Layli :

1. Immisa dhaqdhaqaaq oo kala duwan ayaa aad samayn kartaa?
2. Dadka oo dhammi ma samayn karaan dhaqdhaqaaqyadaa?
3. Sheeg hal dhaqdhaqaaq oo xayawaannada kale qaarkood samayn karaan oo adigu aanad samayn karin.

Dhaqdhaqaaqa waxa dhaliya muruqyada.




Jirka dadku waxa uu ka kooban yahay xubno kala duwan, xubnahaasi waxa ka mid ah muruqyada. Muruqyada waxa ay jirka kaga yaalliin meelo kala duwan. Muruqyada isbeddel ayaa ku dhaca marka qofku dhaqdhaqaaqayo. Muruqyada ayaa dhaliya dhaqdhaqaaqa qofka.

Layli:

1. Sheeg afar xubnood oo ka mid ah jirka dadka.
2. Sheeg saddex xubnood oo dhaqdhaqaaq sameeya oo jirkaaga ka mid ah.
3. Maxaa ku dhaca muruqyada qofka marka uu dhaqdhaqaaq samaynayo?
4. Haddii aan muruqyo jirin dadku dhaqdhaqaaq ma samayn kari lahaayeen?
5. Magacow laba meelood oo jirkaaga ka mid ah oo muruqyada ku yaalla labo labo yihiin?

Dhaqdhaqaaqa kalagoosyada.



Jirkeennu waxa uu ka kooban yahay lafo fara badan. Lafahaasi waxa u dhexeeya kalagoosyo, kalagoosyadu waa meesha ay laba lafood isugu yimaaddaan. Kalagoosyadu waxa ay jirkeenna u suurtageliyaan in uu dhaqdhaqaaq sameeyo, kalagoosyadu waxa ay sameeyaan dhaqdhaqaaqyo kala duwan.


Layli :

Weeraha soo socda middii sax ah ku hor qor callaamaddan

(), middii khalad ahna callaamaddan (x).

1. Meesha laba lafood isugu yimaaddaan waxa loo yaqaan kalagoos ().
2. Kalagoosyadu waxa ay jirkeenna u suurtagelinayaan in uu sameeyo dhaqdhaqaaqyo kala duwan ().
3. Kalagoosyada jirkeenna waxa ay sameeyaan dhaqdhaqaaqyo isku mid ah ().
4. Kalagoosyada jirkeennu dhinac keliya ayaa ay dhaqdhaqaaq u samayn karaan ().
5. Kalagooska jilibku laba dhinac ayaa uu dhaqdhaqaaq u samayn karaa ().

Qalfoofka dadka




Jirka dadku waxa uu leeyahay 206 lafood. Lafahaasi aad ayaa ay u kala duwan yihiin. Lafahaasi marka ay is haystaan waxa loo yaqaan qalfoof. Lafahaasi ayaa sameeya qaabka jirkeenna. Lafahaasi waxa ay ilaaliyaan xubnaha hoose ee jirkeenna. Lafahaasi ayaa inoo sahla in aan soccono.

Layli:

1. Waa immisa tirada guud ee lafaha jirka dadku?
2. Sheeg toban lafood oo ka mid ah lafaha jirka dadka.
3. Sheeg lafta ugu dheer lafaha jirka dadka.
4. Maxaa loo yaqaan marka ay dhammaan is haystaan lafaha jirka dadku?
5. Sheeg saddex waxtar oo ay lafuhu u leeyihiin dadka.
6. Sawir qof ay lafaha jirkiisa oo dhammi ay muuqdaan.

Qalfoofka Xoolaha



Jirka xooluhu waxa uu leeyahay lafo badan. Lafahaasi aad ayaa ay u kala duwan yihiin. Lafahaasi qaarkood waa ay waaweyn yihiin, qaarkoodna waa ay yar yar yihiin.

Tiri lafaha jirka xoolaha ee aad taqaan macyadooda.

Xooggu dhaqdhaqaaq ayaa uu dhaliyaa



Sawirkan waxa aad ku aragtaa dad kala duwa.

Dadkaasi qof walba walax ayaa uu dhaqaajinayaa.

Dadkaasi qof walba waxa uu adeegsanayaa xoog si uu walaxda


u dhaqaajiyo. Xooggu waxa uu dhaliyaa dhaqaaqyo kala duwan.

Laylli:

Weerahan soo socda middii sax ah horteeda ku qor
calaamaddan (✓), middii khalad ahna calaammadan (x).

1. Si walxaha loo dhaqaajiyo waxa loo baahan yahay xoog
().
2. Xooggu waxa uu dhaliyaa dhaqdhaqaaqyo kala duwan.
3. Marka walaxda la riixayo iyo marka la jiidayo isku si
ayaa loo dhaqaajiyaa ().
4. Walxaha waxa loo dhaqaajin karaa iyada oo xoog la
isticmaalin ().
5. Walaxda culus iyo midda fududi waxa ay u baahan yihiin
xoog kala duwan si loo dhaqaajiyo ().

Maxaa saameeya dhaqaajinta walxaha?




Walxaha dhaqaajintooda waa ay kala duwan tahay.
Walxaha fudud si sahlan ayaa loo dhaqaajin karaa.
Walxaha fududi waxa ay u baahan yihiin xoog yar
marka la dhaqaajinayo. Walxaha culus si fudud looma
dhaqaajin karo, walxaha culusi waxa ay u baahan yihiin
xoog badan marka la dhaqaajinayo.

Layli

Erayadan soo socda mid walba weeraha hoose midda uu ku haboon yahay ku buuxi. Xoogga, fududi, duwan, badan, sahan.


1. Riixidda walxuhu waa ay kala _____ tahay.
2. Riixidda walaxda waxa ay ku xiran tahay culayskeeda iyo _____ lagu riixayo.
3. Walaxdu _____ waxa ay u baahan tahay xoog yar marka la dhaqaajinayo.
4. Walaxda culusi waxa ay u baahan tahay xoog aad u _____ marka la rabo in la dhaqaajiyo.
5. Walxaha fudud si _____ ayaa loo dhaqaajin karaa.

Janjeerka iyo sinaantu ma saameeyaan dhaqaajinta?



Riixidda walxuhu waxa ay ku xiran tahay hadba meesha lagu riixayo sida ay tahay, marka walax dalcad la saarayo iyo marka laga soo dejinayaa waa ay kala dhib badan tahay. Sheeg midka sahan labada jeer. Meesha siman iyo meesha aan sinnayn midkee ayaa fudud in walax lagu riixo?

Isticmaalka kabaalka (Leexada)




Sawirradan sare aad ugu firso, waxa aad ku aragtaa carruur kabaal ku ciyaaraysa, weligaa kabaal ma aragtay?

Sidee ayaa loogu ciyaaraa kabaalka

Laba qof oo kala culus haddii ay ku ciyaarayaan wiifowga halkee ayaa ay kala fadhiisanayaan.

Samaynta miisaanka




Sawirkan waxa ka muuqda labo nooc oo ka mid ah miisaanka garbaha leh, weligaa ma aragtay miisaanka garbaha leh?

Sheeg waxyaabaha kala duwan ee uu miisaankaasi ka samaysan yahay? Immisa kafadood ayaa uu leeyahay miisaanka garbaha lehi?

Layli:

1. Sheeg saddex waxyaabood oo aad u baahan tahay si aad miisaan garboole u samaysid.
2. Sheeg saddex ka mid ah qaybaha miisaanka garbaha leh?
3. Maxaa loo yaqaan labada saxan ee miisaanka garbaha leh?
4. Midkee ayaa habboon in labada kafadood ee miisaan garbooluhu isle'ekaadaan iyo in ay kala cuslaadaan?
Sheeg sababta?
5. Sawir miisaan garboole ay qaybihiisa oo dhammi si fiican u muuqdaan.

Isticmaalka miisaanka




Walxaha culayskoodu waa uu kala duwan yahay,

Walxaha culayskooda waxa lagu soo saari karaa miisaan.

Layli:

1. sidee ayaa aad u soo sari kartaa laba walxood midka culus?
2. Sidee ayaa ay noqonayaan kafadaha miisaanku haddii laba walxood oo isku culays ah la kala saaro?
3. Midkee ayaa hoosaynaya kafadaha miisaanka haddii laba walxood oo miisaankoodu kala duwan yahay la kala saaro.


Isticmaalka Khafiyadda



Eeg labada sawir ee sare, waxa ka muuqda afar nin.


Maxaa uu mid walba samaynayaa. Sheeg qalabka ay adeegsanayaan labada nin ee dhulka taagani si hawsha ugu fududaato. Weligaa ma aragtay qalabkaa meel looga shaqaynayo. Sharrax waxtarka uu u leeyahay qalabkaasi nolosheenna.

Naqtiin "Dhaqdhaqaaq"



Dhaqdhaqaaqu ahmiyad weyn ayaa uu u leeyahay nolosheenna, maalin walba waa aynu soconnaa. Baaburta, maraakiibta, dayaaradaha iyo xayawaanka aan rarano oo dhammi waa socdaan. Socod la'aan waxba ma qabsan karno. Sheeg waxtarka kale ee uu dhaqdhaqaaqu u leeyahay nolosheenna.

Baahidda ilayska




Sawirradan aad ugu fiirso. Waxa aad ku aragtaa baabuur iyo nin meel mugdi ah socda. Baabuurka waxa ka baxaya ilays. Ninkuna waxa uu sitaa toosh iftiimaya. Jihadee ayaa ay ilaska baabuurka iyo tooshku u baahayaan. Wax ilays ah oo dhinacyada u baxayaa ma kuu muuqdaa?

Layli:

Weerahan soo socda middii run ah horteeda ku qor calaamaddan (), middii been ahna calaamaddan (x).

1. Ilasku marka uu baahayo, waxa uu raacaa xarriiq toosan ().
2. Iftiinka baabuurta habeenkii waxa uu raacaa xarriiq toosan ().
3. Haddii habeen mugdi ah toosh aad shiddid iftiinkiisu waxa uu gaarayaa dhinac walba ().
4. Ilayska qorraxdu waxa uu inncoogu yimaaddaa isaga oo raacaya xarriiqyo toosan ().
5. Ilayska xiddiguhu waxa uu innagu soo gaaraa isaga oo xariiqyo qalloocan raacaya ().

Noqodka ilayska





Ilaysku marka uu ku dhaco walxaha siman qaarkood dib ayaa uu uga soo noqdaa. Weligaa ma aragtay carruur muraayad iska cawiraysa? Maxaa ay sameeyaan? Ma fiirin kartaa muraayadda la isku eego haddii qorraxda la hor dhigo? Iska ilaali weligaa in aad fiirisid muraayad qorraxda ku beegan.

Layli:

1. Maxaa ku dhaca fallaaraha ilayska qorraxda marka ay ku dul dhacaan muraayadda la isku eego?
2. Sheeg laba walxood oo ilaysku dib uga soo noqdo marka uu ku dul dhaco.
3. Ma isku mid baa jihada ilaysku raacaa marka uu muraayadda ku soo dhacayo iyo marka uu ka noqonayaa?
4. Ma habboon tahay in muraayadda la isku cawiraa? Sheeg sababta?
5. Samee sawir muujinaya habka ilaysku uga soo noqdo walxaha siman.

Sidee ayaa aynnu wax u aragnaa?



Labadan sawir aqalka ka muuqda waa isku mid. Maxaa ay ku kala duwan yihiin? Midkee ayaa ay kula tahay in uu ninku si fiican wax u arkayo? Waa maxay sababtu? Ilays la'aan waxba ma arki karno. Walxaha waxa aynnu aragnaa marka ilayska walxaha ka soo noqdaa indhaheenna soo gaaro.

Qofka iyo hummaagiisa



Marka aan feeranayno waxa aan isku fiirinnaa muraayad. Hummaaggeenna ayaa ka dhex muuqda muraayadda marka aan isku fiirinno. Hummaaggu waa muuqaalka qofka ee muraayadda ka dhex muuqda. Qofka iyo hummaaggiisu waa ay isku eg yihiin.


Layli

Weerahan soo socda midda runta ah horteeda ku qor " R "

midda beenta ahna horteeda ku qor " B "

1. Hummaaggu waa muuqaalka laga dhex arko muraayda marka la isku fiirsho ().
2. Qofka iyo hummaaggiisu waa ay isku eg yihiin ().
3. Adiga oo muraayad hortaagan haddii aad gacantaada midig taagtid waxa aad moodaysaa in aad gacanta bidix taagtay ().
4. Haddii aad biyo fadhiya oo nadiif ah kor istaagtid waxa aad arki kartaa hummaagaaga ().
5. Hummaagga qofku aad ayaa uu u yaraada mark qofku muraayadda ka sii fogaadaba ().

Kala duwanaanta hummaag samaynta walxaha





Marka aad muraayad is hor dhigto waxa aad aragtaa hummaagaaga oo muraayadda ka dhex muuqda.

Soo qaado qaaddada wax lagu cuno oo aad u dhalaalaysa, ka dibna isku fiiri sida muraayadda.

Maxaa aad aragtaa? Hummaagga qaaddadu samaysaa ma ka duwan yahay ka muraayaddu samayso?

Ma taqaan walxo kale oo hummaag samayn kara?

Gudbinta Ilayska




Haddii toosh lagu iftiimiyo quraarad ilaysku si fudud ayaa uu uga dusaa. Ma taqaan walxo kale oo uu ilaysku ka dussi karo sida quraaradda? Walxaha qaarkood sida biraha ilaysku kama dusi karo. Tiri walxaha kale ee aan ilaysku ka dusi karin ee aad taqaan.

Layli :

1. Magacaw laba walxood oo ilays gudbiye ah iyo afar walxood oo aan ilaysku ka gudbi karin.
2. Biyaha iyo caanaha midkee ayaa ilaysku sahal uga gudbi karaa?
3. Koob ka samaysan quraarad iyo mid dhoobo ka samaysan haddii dhinac lagaga iftiimiyo toosh midkee xaggiis dambe mugdi noqonaysa? Sheeg sababta.
4. Haddii muraayadaha indhaha la gashado laga samayn lahaa bir adag meesha quraaradda maxaa dhici lahaa?
5. Walxaha ilayska gudbiya iyo kuwa aan gudbin ee deegaankiinna laga helo midkee ayaa badan?

Qofka harkiisa




Marka ilays lagu iftiimiyo walax guri, geed ama qof, walaxdii waxa ay is hortaagtaa iftiinka ilayska. Taasi waxa ay keentaa in harkii walaxdu ku samaysmo dhinaca dambe ee walaxda.

Layli

1. Midkee ayaa uu dheer yahay harka qofku marka iftiinku aad ugu dhow yahay iyo marka uu ka fog yahay?
2. Samee sawir muujinaya xiriirka ka dhexeeya ilayska, qofka iyo harkiisa.

Naqtiin "Ilays"



Si fiican ugu fiirso sawirrada sare, waxa aad ku aragtaa labo qof. Sheeg mid walba waxa uu samaynayo. Sawirkee ayaa muujinaya waxtarka ilaysku u leeyahay nolosheenna. Sawirkee ayaa muujinaya in ilaysku xarriiqyo toosan raaco marka uu baahayo?

Layli:


Weeraha soo socda middii run ah horteeda ku qor

calaamaddan (✓), middii been ahna calaamaddan (X).

1. Qorraxdu waa meesha ugu muhiimsan ee aan ilayska ka helno ().
2. Ilaysku marka uu baahayo waxa uu raacaa xarriiqyo qalloocan ().
3. Ilaysku dhammaan walxaha waa uu ka gudbi karaa markaa lagu iftiimiyo ().
4. Walxaha waxa aan aragnaa marka ilayska ka soo noqdaa indhaheena soo gaaro ().
5. Dhammaan walxuhu waxa ay samayn karaan hummaag marka la isku fiirsho ().

Jabaq

Jabaqaha deegaanka



Maalin walba waxa aad maqashaa dhawaaqyo kala duwan.

Maxaa sameeya dhawaaqyadaa? Dhawaaqyadaa

qaarkood waxa sameeya xayawaan, qaarkoodna waxa

sameeya ma-noole. Mid walba tusaale ka bixi.

Dhawaaqyada qaarkood dadku waa uu jecel yahay


maqalkooda, qaarna waa uu neceb yahay.

Halkee ayaa aad wax ka maqli kartaa




Dadku waxa ay isku af-gartaan hadalka. Qofku waxa uu sheegayo si aad u garatid waa inaad hadalkiisa maqashid. Hadalka waxa aad si fiican u maqli kartaa marka qofku dhow yahay. Marka uu ka sii fogaadaba maqalku waa uu sii yaraadaa. Halkee ayaa aad qofka kula hadlaya si fiican uga maqli kartaa?

Baahida jabaqda





Subaxii marka dugsiga la galayo waxa la garaacaa dawan. Dhawaaqa dawanka waxa laga maqlaa dugsiga hareerihisa oo dhan. Jabaqda dawanku waxa ay u baahdaa dhinac walba. Dhinacyad dugsiga oo dhan ma isku mid ayaa looga maqlaa dhawaaqa dawanka? Dhinac dabayshu ka imaanayso iyo dhinaca ay u socoto midkee ayaa si fiican looga maqlaa?

Maxaa aynnu wax ku maqalnaa?




Waxa aynnu leennahay laba dhegood. Dheguhu waa xubinta aan wax ku maqalno. dhegaha la'aantood waxba ma maqli karno. Haddii aad dhegaha is-qabatid si fiican wax ma u maqli kartaa? Marka aad hal dheg is-qabatid iyo marka aad labada is qabatid. Midkee ayaa wax maqalkaagu fiican yahay?

Tebinta Jabaqda



Subax walba waxa aad maqashaa jabaqyo fara badan. Walxaha jabaqyadaa samaynaya qaarkood aad ayaa ay kaaga fog yihiin. Adiga iyo walxahaas waxa idiin dhexeeya hawo. Jabaqdu waxa ay soo dhex martaa hawada. Jabaqdu ma dhexmari kartaa adkaha sida ay hawada u dhexmarto?


Telofoon ma samayn kartaa?



Aad ugu firso sawirka sare. Maxaa ay tahay in ay labada wiil samaynayaan? Sharax mid walba waxa uu samaynayo?

Midkee ayaa ay kula tahay in uu hadlayo, midkee ayaase wax dhegeysanaya? Ma taqaan qalabka sidan u shaqeeya magaciisa. Ma camayn kartaa qalabkan oo kale?

Qalabka Muusikada



Ma jeceshahay dhegeysiga muusikada? Weligaa ma aragtay muusika la tumayo? Tiri qalabka musikada ee degmadiinna laga helo. Durbaanku waa qalabka ugu caansan ee meel walba laga helo. Ma taqaan sida loo sameeyo durbaanka?

Sidee ayaa durbaanka loo tumaa?

Layli

1. Magacow afar ka mid ah qalabka muusikada ee degmadiina laga helo.
2. Sharax kooban ka bixi qalabka aad kor ku magacawday mid walba sida loo isticmaalo.
3. Qalabka muusikada ee la tumo midkee ayaa ugu caansan oo meel walba laga heli karaa?
4. Maxaa laga sameeyaa durbaanka?
5. Sawir shan ka mid ah qalabka muusikada ee degmadiina laga helo.



Naqtiin "Jabaq"



Eeg adiga oo aad ugu fiirsanaya sawirrad sare. Mid walba maxaa uu muujinayaa? Sawirradee ayaa muujinaya kala duwanaanta jabaqaha deegaankeenna laga helo? Maxaa lagu sameeyaa qalabka ka samaysan labada koombo iyo xarigga ee sawirka sare ka muuqda?

Xilliyada iyo Cimilada

Kala duwanaanta Maalmaha.



Maalmuhu waxa ay leeyihin astaamo kala duwan.

Maalmaha qaarkood cirku waxa uu leeyahay daruuro.

Daruurahaasi waa ay kala duwan yihiin. Maalmaha qaarkood roob ayaa da'a, dhulkuna waa qabow. Maalmaha qaarkood roob ma da'o, dhulkuna waa kulayl.

Layli :

1. Maanta cirku wax daruuro ah ma leeyahay?
2. Hawadu maanta ma deggan tahay, mise dabayl ayaa jirta?
3. Maanta iyo shalay maxaa ay ku kala duwan yihiin?

Xilliga Gu'ga:



Gu'gu waa xilli barwaaqo ah.

Gu'gu waa xilliga roobka ugu

badani innoo da'o. Gu'ga dhulka

oo dhammi waa cagaar, xooluhuna

waxa ay helaan biyo badan iyo

daaq wanaagsan.

Gu'gu waa xilliga ay xooluhu innoo dhalaan. Gu'ga waxa aynnu helnaa aanno badan. Gu'gu waa xilliga ay xooluhu cayilaan. Gu'ga dhirtu waxa ay bixisaa miro badan oo uu dadku cuno.



Gu'gu waa xilliga dhuiku helo

roobka ugu badan.. Dadku xilliga

gu'ga ah waxa ay beertaan beera-

hooda. Gu'gu waa xilliga miraha

ugu badan ee aynnu cunno aan

beeranno.



Layli:

Weerahan soo socda middi run ah horteeda ku qor calaamaddan (✓), middii been ahna horteeda ku qor calaamaddan (X).

1. Gu'gu waa xilliga roobka ugu yari innoo da'o ().
2. Gu'gu waa xilliga ay xooluhu innoo cayilaan ee annu helno caanaha iyo subagga ugu badan ().
3. Xilliga gu'ga ah dhirta oo dhammi waxa ay noqotaa cagaar, waxa ayna bixisaa caleemo qurux badan ().
4. Xilliga gu'ga ah xooluhu waxa ay ka cabbaan ceelal dhaadheer oo uu dadku ka waraabiyo ().
5. Gu'gu waa xilliga miraha beeruhu innoo bislaadaan ee aynnu guranno ().

Xilliga Xagaaga

Xagaagu waa xilliga gu'ga ku xiga.

Xagaaga roob badani ma da'o, cirkuna daruuro badan ma yeesho.

Xagaaga xeebaha qaarkood waa kulayl.



Xilliga xagaaga waxa bislaada mirihii beeraha ee gu'ga la beeray. Xagaaga dabayl badan ayaa dhacda. Xagaaga biyaha ayaa yaraada, dhirtuna waa dhartaa, Dhulkuna caws badan ma laha.



Layli:

Weeraha soo socda middii run ah horteeda ku qor calaamadan (✓), midkii been ahna ku qor calaamadan

(x)

1. Xagaagu waa xilliga miraha beeruhu innoo bislaadan ().

2. Xilliga xagaaga roob badan ayaa inoo da'a ().

3. Xagaaga dabayl badan ayaa dhacda ().

4. Xilliga xagaaga xoolaha caano badan ayaa aynnu ka helnaa ().

5. Xagaaga xeebaheenna qaarkood waa kulayl ().

Xilliga Dayrta



Dayrtu wa xilliga labaad ee roobka ugu badani innoo da'o. Xilliga dayrta ah roobka iyo barwaaqada waa ay ka yar yihiin gu'ga. Xilliga dayrta ah xoolihii gu'ga dhashay waa ay koreen.

Dayrtu waa xilliga labaad ee wax la beerto. Meelaha qaarkood miraha dayrta la beertaa waa ay ka duwan yihiin kuwa gu'ga la beerto. Tiri miraha degmadiinna laga beerto Xilliga dayrta ah.




Layli :

Weerahan soo socda mid walba horteeda waxa ku qoran laba eray. Ku buuxi erayga ku habboon meesha bannaan.

1. Dayrtu waa xilliga _____ ee roobka ugu badani innoo da'o. (labaad, saddexaad).
2. Xilliga dayrta ah barwaaqadu waa ay _____ tahay xilliga gu'ga ah (ka badan, ka yar).
3. dayrta waa xilliga wax _____ (la beerto, aan la beeran).
4. Caanaha iyo subagga ugu badan waxa aan helnaa xilliga _____ (Gu'ga, dayrta).
5. Dayrtu waa xilliga ku xiga _____ (gu'ga, xagaaga).

Xilliga Jiilaalka



Jiilaalku waa xilliga ka dambeeya dayrta. Jiilaalku waa xilli abaar ah oo aannu roob da'in.

Jiilaalka dhulku waa qallalaa, biyuhuna waa ay yaraadaan.

Xilliga jiilaalka ah xooluhu waxa ay ka cabbaan ceelasha. Xilliga jiilaalka ah dadku meelo fog fog ayaa ay ka soo dhaansadaan biyaha.




Xilliga jiilaalka ah caano badan xoolaha lagama helo. Dadkuna xilligaa waxa ay cunaan miraha beeraha ka baxa. Xilliga jiilaalka ah habeenku aad ayaa uu u qabow yahay.

Layli:-

Erayadan soo socda mid walba weeraha hoose meesha uu ku haboon yahay ku buuxi: Xilliga, abaar, jiilaalk, dayrta, habbeennada, caanaha, subaggu, caanuhuna.

1. Xilliga _____ ah dhirtu waa ay qalashaa _____ waa ay yaraadaan.
2. Jiilaalku waa xilli _____ ah oo uu dhulku qalalan yahay.
3. _____ Jiilaalka ah xooluhu waxa ay ka cabsaan ceelasha.
4. Jiilaalku waa xilliga _____ ka dambeeya, _____ jiilaalkuna aad ayaa ay u qabow yihiin.
5. Jiilaalku waa xilliga _____ iyo _____ ugu yar yihiin.

Naqtiin "Xilliyada iyo Cimilada"






Eeg labadan sawir ee sare. Maxaa ay ku kala duwan yihiin?

Sawirkee ayaa muujinaya xilli abaar ah, sawirkeese muujinaya xilli barwaaqo ah? Maxaa ay ku kala duwan yihiin xilliga abaarta ah iyo xilliga barwaaqada ahi? Afarta xilli ee sannadka kuwee ayaa badanaa barwaaqo ah, Kuweese badanaa abaar ah.



Naqtiin Guud

Sawirradan hoose mid walba maxaa uu muujinayaa?



Naqtiin guud:

Aad ugu fiirso sawirradan hoose, ka dibna sharax mid walba waxa uu tilmaamayo.



Xarunta Horumarinta Manaahijta Waxa ay u mahad celineysaa:-

goreyaasha buugga:

- | | |
|----------------------------|------------------------------|
| 1. Cumar Jaamac Maxamed | 2. Rashiid Ismaaciil Xuseen |
| 3. Cali Maxamed Axmed | 4. Maryan Xaashi Cawaale |
| 5. yaasiin Cismaan Dhinbil | 6. Axmed Ibraahim Kooshin |
| 7. Deeqa Cilmi Cali | 8. Maxamed Ismaaciil Suldaan |

Sawirayaasha Buugga

- | | |
|-----------------------------|--------------------------------|
| 1. Ibraahim Maxamed Cismaan | 2. Maxamed Sheekh Cumar (joon) |
|-----------------------------|--------------------------------|

Madaxa Qaybta KMM
A. M. Bookh

La taliyaha qaybta KMM
Jim Goodall

Xiriiriyaha Madbacadda iyo X. H. Manaahijta
Xuseen Maxamed Ismaaciil

La taliyaha Gud ee X. H. Manaahijta
Mike A. Kiernon

Waxaa kale oo mahad gaar ahaaneed leh bahda Xarunta Horumarinta Waxbarashada UNESCO ee Baydhabo oo kaalin weyn ka qaatey dib u habeynta buuggan daabacaadiisa labaad:-

- | | |
|--|----------------|
| 1. Cabdullaahi Cabdiraxman Ibrahim (Tubey) | <u>Garaace</u> |
| 2. Maxamed Adan Guuleed (Juuni) | <u>Layout</u> |

La Taliyaha

G. Retamal

UNESCO EDUCATIONAL ADVISER FOR SOMALIA

MAHADNAQ

Xarunta Horumarinta Manaahijtu Waxa ay u mahad celineysaa:

Qoreyaasha buugga

- | | |
|----------------------------|------------------------------|
| 1. Cumar Jaamac Maxamed | 2. Rashiid Ismaaciil Xuseen |
| 3. Cali Maxamed Axmed | 4. Maryan Xaashi Cawaale |
| 5. yaasiin Cismaan Dhinbil | 6. Axmed Ibraahim Kooshin |
| 7. Deeqa Cilmi Cali | 8. Maxamed Ismaaciil Suldaan |

Sawirayaasha Buugga: 1. Ibraahim Maxamed Cismaan

2. Maxamed Sheekh Cumar (Joon)

Madaxa Qaybta KMM: A. M. Bookh

La taliyaha qaybta KMM: Jim Goodall

Xiriiriyaha Madbacadda iyo X. H. Manaahijta: Xuseen

Maxamed Ismaaciil

La taliyaha Guud ee X. H. Manaahijta: Mike A. Kiernon

Waxaa kale oo mahad gaar ahaaneed leh bahda Xarunta Horumarinta Waxbarashada UNESCO ee Baydhabo oo kaalin weyn ka qaatay dib u habeynta buuggan daabacaadiisa labaad:

Tifaftiridda: Cusmaan Sheekh Adan Xaydar

Garaacidida: Cabdullaahi Cabdiraxman Ibrahim (Tubey)

Layoutka: Maxamed Adan Guuleed (Juuni)

La Taliyaha

G. Retamal, UNESCO Educational Adviser for Somalia



United Nations Educational, Scientific and Cultural Organizations

SAYNIS



This edition has been produced with the financial support of the European Community. UNESCO WAXA AY U MAHAD CELINAYSAA EC-SOMALIA OO SUURTA GELISAY DIB U DAABICIDDA BUUGGAN.